## Sideen ku doortaa Guriga Qoyska Qofka Weyn?

Qofka iyo qoyskooda ama wakiilkooda sharciyeed ayaa dooranaya daryeel bixiyaha. Daryeel bixiyaha waxaa khasab ku ah in loo doorto sida DD ku Takhasusay Guriga oona rukhsad ka haysta dhinaca Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada. Maamulka Naafooyinka Koritaanka waxaa khasab ku ah in uu oggolaado meelaynta kahor inta aadan usoo guurin.

## Halkeen ka helaa macluumaaddheeraad ah oo ku saabsan Guryaha Qoyska Qofka Weyn?


- Waxaad wici kartaa xafiiska Maamulka Naafooyinka Koritaanka ee gobolkaaga waxaadna ka codsan kartaa in aad la hadashid Maamulahaaga Xogta Kiiska.
- Waxaad kala tashan kartaa Barnaamijka Diiwaanka Arimaha Dulmiga ah ee Daryeelka Muddada Dheer lambarkan 1-800-562-6028 ama booqo boggooda internetka: www.ltcop.org
- Waxaad ka booqan kartaa bogga internetka ALTSA halkan www.altsa.dshs.wa.gov/pubinfo/housing/other/#AFH



**Wixii ku saabsan macluumaad dheeraad ah, ka booqo bogga internetka Maamulka Naafooyinka Koritaanka halkan:**

**www.dshs.wa.gov/dda**

## Halkuu kuyaalaa Maamulka Naafooyinka Koritaanka?




**Gobolka 1**
**1-800-462-0624**
TTY (509) 568-3038
1611 W. Indiana Ave.
Spokane, WA 99205-4221
Teleefoonka (509) 329-2900

**Gobolka 2**
**1-800-788-2053**
TTY (360) 714-5002
840 N. Broadway
Bldg. A., Suite 100
Everett, WA 98201-1288
Teleefoonka (425) 339-4833

**Gobolka 3**
**1-800-248-0949**
TTY (253) 572-7381
1305 Tacoma Ave. S.
Suite 300
Tacoma, WA 98402
Teleefoonka (253) 404-5500

**Gobolka 1**
**1-800-822-7840**
TTY (509) 454-4321
3700 Fruitvale Blvd.
Suite 200
Yakima, WA 98909-2500
Teleefoonka (509) 225-4620

**Gobolka 2**
**1-800-314-3296**
TTY (206) 720-3325
1700 E. Cherry St. #200
Seattle, WA 98122
Teleefoonka (206) 568- 5700

**Gobolka 3**
**1-800-339-8227**
TTY (360) 586-4719
Point Plaza East
Bldg. 2, 3rd Floor
6860 Capitol Blvd. SE
Olympia, WA 98504-5315
Teleefoonka (360) 725-4250

Washington State
Department of Social & Health Services
*Transforming lives*
DSHS 22-442 SM (Rev. 8/17) Somali

# Guryaha Qoyska Qofka Weyn (AFH)

## Taageerooyinka iyo Adeegaha Maamulka Naafooyinka Koritaanka



Washington State
Department of Social & Health Services
*Transforming lives*

## Muxuu yahay Guriga Qoyska Qofka Weyn (AFH)?

Guriga Qoyska Qofka Weyn (AFH) waa hoy uu leeyahay ama kireeyo daryeel bixiye rukhsadaysan. Waxay bixisaa qol iyo cunto, horu joogid 24-saac ah, iyo daryeel shakhsiyeed loogu talogalay 2 illaa 6 qofeed, da'doodu tahay 18 ama ka weyn. Guryaha waxaa rukhsad laga siiyay oona laga maamulaa dhinaca Adeegaha Daryeelka Deegaanka (RCS) Qaybta Maamulka Taageerada Muddada Dheer iyo Da'weynaanta ee Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada (ALTSA).

## Qofkee ku nool Guryaha Qoyska Qofka Weyn?

Guryaha Qoyska Qofka Weyn waxaa laga helaa dhinaca Maamulka Naafooyinka Koritaanka (DDA) waxaana xaq u leh dadka da'doodu tahay 18 iyo ka weyn kuwaas oo u baahan daryeel, taageero, iyo horujoogid. Dadka deegaanka waxaa laga maalgelin karaa tooska Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada (Medicaid) ama lacag bixin khaas ah. Wax ka baddan 1,600 dad oo qabba naafooyinka koritaanka ayaa ku nool Guryaha Qoyska Qofka Weyn ee ku yaala Washington.

## Maxaa tababar ah ayaa looga baahanyahay daryeel bixiyayaasha iyo adeeg bixiyayaasha Guriga Qoyska Qofka Weyn?

Dhammaan daryeel bixiyayaasha Guriga Qoyska Qofka Weyn waxaa khasab ku ah in ay kasoo baxaan shuruudaha tababarka iyo rukhsad siinta (Cutubka 388-76 WAC). Daryeel bixiyaha rukhsada haysta iyo maamulaha hoyga waa in ay kasoo baxaan ama dhammeeyaan koorsada Tababarka Gaarka ah ee Naafooyinka Koritaanka kahor inta aysan la shaqaynin dadka deegaanka qabba naafooyinka koritaanka (https://www.dshs.wa.gov/dda/events-and-training/events-and-training).

- Maamulka Naafooyinka Koritaanka wuxuu bixinayaa tababarka gaarka ah iyo caawimaada farsamo ee guriga-gudihiisa ah.
- Shaqaalaha goboleed ee Maamulka Naafooyinka Koritaanka wuxuu bixiyaa dammaanad tayo leh oo loogu talogalay wixii khalad ah ee guryaha ku saabsan.

Dhammaan daryeel bixiyayaasha Guriga Qoyska Qofka Weyn iyo adeeg bixiyayaasha waxaa looga baahanyahay in ay kasoo baxaan

- Shuruudaha tababarka hoos imaanaya Cutubka 388-112 WAC.
- 12 saacadood oo waxbarasho joogto ah midaas oo ah sannad kasta.

## Muxuu yahay tababarka kale ee loo soo jeediyo daryeel bixiyayaasha iyo adeeg bixiyayaasha Guriga Qoyska Qofka Weyn?

Waxbarasho joogto ah ayaa looga baahanyahay dhammaan daryeel bixiyayaasha iyo adeeg bixiyayaasha Guriga Qoyska Qofka Weyn. Maamulka Naafooyinka Koritaanka wuxuu bixiyaa tababaro baddan oo gaar ku ah arimaha naafada, taageero dhaqan wanaagsan, iyo mowduucyo kale. Tababaradaan waa kuwo lacag la'aan u ah dadka ka shaqeeya Guriga Qoyska Qofka Weyn waxaana laga helayaa bogga internetka Fursadaha Tababarka Daryeel bixiyaha Maamulka Naafooyinka Koritaanka:

https://www.dshs.wa.gov/dda/events-and-training/events-and-training

## Muxuu ka filanayaa Maamulka Naafooyinka Koritaanka daryeel bixiyayaasha iyo adeeg bixiyayaasha Guriga Qoyska Qofka Weyn?

Maamulka Naafooyinka Koritaanka wuxuu ka filanayaa dhamaman daryeel bixiyayaasha iyo adeeg bixiyayaasha Guriga Qoyska Qofka Weyn in ay hubsadaan in qof kasta oo meesha degan uu helo:

- Ammaan iyo caafimaad;
- Karti ay ku qabsadaan hawlahooda maalin laha ah oona ka daba ordaan ahdaaftooda shakhsiyeed;
- Awood iyo doorasho;
- Ixtiraam iyo ka qayb qaadasho nafsadooda iyo dadka kaleba ah;
- Ka mid noqosho ay kamid noqdaan nolosha bulshadeed iyo jireed ee bulshadooda; iyo
- Xiriiro ay la yeeshaan saaxiibadooda iyo qaraabadooda.

## Maxay yihiin adeegaha lagu bixiyo Guriga Qoyska Qofka Weyn?

Daryeel bixiyayaasha iyo adeeg bixiyayaasha Guriga Qoyska Qofka Weyn waxaa looga baahanyahay in ay bixiyaan:

- Qol iyo cunto;
- Horujoogid 24-saacadood ah; iyo
- Caawimaad lagu caawiyo daryeelka shakhsiyeed sida loogu sheegay qiimeynta CARE ee qofka meesha degan.

Qofkasta oo meesha degan waa in uu haystaa Qiimeyn Dhammeystiran iyo Qiimeyn Warbixin Soo sheegid ah (CARE) midaas oo uu buuxiyo Maamulaha Xogta Kiiska Maamulka Naafooyinka Koritaanka kahor inta aan qofka meesha la gelinin. Qiimeyntaan waxaa lagu sameeyaa qofka iyo qoyskiisa ama qoyskeeda ama wakiilka sharciyeed. Qiimeyntu waxay faah-faahinaysaa baahida taageero ee uu qofku u baahanyahay iyo adeegaha uu jecelyahay, iyo sidoo kale waxay xadidaysaa heerka daryeelka iyo adeegaha. Qiimeyntaan iyo qorshaha adeega waa in si sannadle ahi looga muraajaceeyo weliba ayada oo ay tahay waraysi-shakhsiyeed dhinaca Maamulaha Xogta Kiiska Maamulka Naafooyinka Koritaanka. Maamulaha Xogta Kiiska Maamulka Naafooyinka Koritaanka waa in uu booqdaa guriga wakhti kale haddii aan qiimeynta lagu buuxinin guriga.

Intaas waxaa sii dheer, daryeel bixiyaha Guriga Qoyska Qofka Weyn waxaa looga baahanyahay in uu buuxiyo Qorshaha Daryeelka laga Xaajooday. Midkaan waa qorshe daryeel shakhsiyeed midkaas oo uu sameeyo qofka iyo qoyska qofka ama wakiilka sharciyeed. Qorshaha Daryeelka laga Xaajooday waxaa kamid ah adeego iyo hawlo ay ka wada xaajoodeen ama ka wada hadleen qofka iyo daryeel bixiyaha, sida:

- Caawimaad bixinta hawlaha daryeelka shakhsiyeed ah; iyo
- Helida hawlaha bulshada, ballamaha caafimaadka, iyo gaadiidka.

## Qofkee bixinaya adeegaha Guriga Qoyska Qofka Weyn?

Dadka meesha degan waxaa khasab ku ah in ay ka qayb qaataan qiimaha qolkooda iyo cuntadooda midaas oo ay ka bixiyaan ayaga dakhligooda. Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada waxay bixinaysaa inta harta ayada oo ay tahay mid ku salaysan heerka qiimeynta baahida qofkasta.

## Qofkee kormeeraya adeegaha Guriga Qoyska Qofka Weyn?

**Daryeel bixiyayaasha Maamulka Naafooyinka Koritaanka:**

- Maamulid Kiis, ay ku jirto qiimeyn-shakhsiyeed sannadle ah oo CARE ah.
- Takhasuslayaal Wanaajinta Tayada iyo Waxqabadka Gobolka ah ayaa soo booqanaya Guryaha Qoyska Qofka Weyn si ay qiimeyn ugu sameeyaan tayada adeegaha una bixiyaan latalin iyo tababar.
- Kalkaaliye Diiwaan gashan ayaa dhici karta in uu soo booqdo Guriga Qoyska Qofka Weyn si uu qiimeyn ugu sameeyo qorshaha adeega una siiyo la talin iyo tababar daryeel bixiyayaasha iyo adeeg bixiyayaasha.

**RCS waxay bixisaa:**

- Rukhsad iyo kormeerid lagu sameeyo dhammaan Guryaha Qoyska Qofka Weyn.
- Rukhsad bixiyaha wuxuu samaynayaa booqasho aanan lasoo sheegin midaas oo ay ku sameeyaan Guriga Qoyska Qofka Weyn kasta ee rukhsada haysta ugu yaraan 18 bilood kasta.
- Si ay ula-socdaan xad gudubyada lagu xad gudbo xeerarka rukhsada, midaas oo ka dhallan karta tababar dheeraad ah, latalin, ganaaxyo, in la joojiyo isqorida, ama joojinta rukhsada, burin ama dib ula noqosho, ama joojin.
- Eedeymaha xad gudubka waxaa loo wareejinayaa Qaybta Xalinta Cabashada (CRU) iyo shaqaalaha RCS waxaa loo xilsaarayaa in ay baaritaan ku sameeyaan intiiba loo baahdo. RCS sidoo kale waxay baaritaan ku samaynaysaa dhammaan cabashooyinka xad gudubka lagu xad gudbo hoyga kuwaas oo laga soo waco Khadka CRU ee marwalba shaqeeya midkaas oo ah lambarkan1-800-562-6078.

